# *Warbixinta Wax-qabadka Maxkamadaha Shareecada DDS*

Si loo suurto galiyo habsamida geeddi-socodka shaqo ee u garsooridda shacabkeenna guud ahaan, gaar ahaanna Maxkamadaha Shareecada DDS, ayaa waxaa loo baahday in dib loo qeexo awoodaha, waajibaadka iyo hab-shaqeedka Maxkamadaha Shareecada DDS. Waxaana dib loogu aasaasay Bayaanka Tirsiga **190/2012 T.I**

Sidoo kale, waxaa bayaankaas lagu dhisay **Guddiga Maamulka Qaadiyada DDS**, kuwaas oo guda galay waajibaadkoodii.

***Hadafka***

*Hadafka & ujeeddada* Maxkamada shareecadu waa in loo fidiyo macaamiisha ama dhinacyada dacwadu ka dhaxeyso adeeg Garsoor oo caddaalad ah, firfircooni, wakhti iyo kharash tashiil leh oo ku saleysan shareecada Islaamka.

***Himilada***

*In* la helo ha'yad Garsoor oo sugta saraynta shareecada & sharciga hanatayna kalsoonida bulshada, taas oo tusaale lagu daydo u noqota deegaanada kale ee dalka.

***Hab-Dhaqanka Shaqo ee Maxkamadaha Shareecada DDS***

Hay'adda Qaadiyada waxaa hab-dhaqan u ah mabaadii'dan hoos ku xusan :

- ⇒ Sinaan
- ⇒ Cadalad
- ⇒ Madaxbanaani
- ⇒ Dhax-dhaxaadnimo
- ⇒ Karti &kalsooni
- ⇒ Heshiisiin & isu soodhaweyn labada dhinac (Sulxi)
- ⇒ In si fudud loo gaadhi karo

**Qorshe-Sannadeedka 2014** waxaa xoogga la saaray sidii loo heli lahaa Qaadiyaal tayadoodu ay sarayso, faham buuxana ka haysta shaqada ay bulshada u hayaan, isla markaana loo tayeyn lahaa habka dacwadaha loo maareeyo bar-bilow ilaa dhamaad.

Dhinaca kale in la xaqiijiyo hufnaanta iyo cadcadaanta dacwadaha la qaadayo, si wax kasta oo tuhun iyo musuq la xidhiidha uu meesha uga baxo. Sidoo kalena, in la helo waayo aragnimo & aqoon dheeraad ah, iyo khibrad wadaag & iskaashi isku dhafan oo lala yeesho bahwadaagta.

Haddaba, hawlaha muhiimka ah ee Maxkamadaha Shareecada DDS u qabsoomay **QS 2014** waxaa ka mid ah:-

1) Tababarada, Shirarka iyo Wacyi-gelinta
2) Qiimeynta iyo Is baddelka Qaadiyada
3) Kormeerka
4) Khibrad wadaaag – dalka Gudihiisa & Dibeddiisaba
5) Hawlaha kale ee Muhiimka ah
6) Xogta Dacwadaha & Dakhliga ka soo xerooday

## 1) TABABARADA, SHIRARKA IYO WACYI-GELINTA BULSHADA

Iyadoo la hirgalinyo qorshe tababareedkii Maxkamadu dajisay, waxaa la qabtay tababaro loogu talagalay in kor loogu qaado tayada iyo aqoonta qaadiyada iyo shaqalahaba. Tababaraan oo iskugu jiray kuwo qorsheysnaa iyo kuwa ay u fidiyeen bahwadaagta Maxkamadaha Shareecada DDS.

Wadarta guud ee xubnaha ka faa'iideystayna waa **155.**

| T.T | TABABARADA Qorshe-sannadeedka 2014 | TIRADA XUBNAHA KA FAA'IDAYSTAY |
|---|---|---|
| 1 | WAXBARASHADA SHAREECADA & QANUUNKA OO HEER DIPLOMA AH (waxaa bixisa Ilays International College, Jigjiga) | 33 |
| 2 | HABKA & GEEDDI SOCODKA DACWADAHA EE SHAREECADA ISLAAMKA IYO MAAMULKA SUUBAN OO LA SIIYEY GUDDOOMIYEYAASHA MAXKAMADAHA GOBOLADA | 11 |
| 3 | TABABARKA QAADIYADA & REJSITARALADA MAXK. GUUD EE SHAREECADA, MAXK. GOBOLKA FAAFAN, IYO MAXKAMADAHA MAAMUL MAGAALOOYINKA | 105 |
| 4 | XIRFADDA ADEEGGA MACAAMIISHA, MAAMULKA SUUBAN & WAAJIBAADYADA SHAQO EE MAXKAMADAHA SHAREECADA OO LA SIIYEY SHAQAALAHA TAAGEERADA AH | 65 |
| 5 | TABABARADA LAGA HELAY BAHWADAAGTA | 20 |
| | **WADARTA** | **234** |

## Dood Cilmiyeed iyo Wacyigalin Galinta Xuquuqada Qoyska

Waxaa la qabtay dood cilmiyeed ku saabsan Arrimaha Guurka sharciga ah iyo kaan sharicag ahayn. Dooddan waxaa fuliyay Qaadiyada iyo culumada Qaybo ka mid ah oo aqoon dheer u leh shareecada , sidoo kale waxaa ka qaybqaatay dhaqanka iyo Dumarka .

Barnaamijkan waxaa gundhig looga dhigay su' aalo la waydiiyay shacabka (Guurka shirciga ah iyo ka sharci darada ah, xanaanada caruurta & dhaxalka) ugu danbeyna waxaa laga soo saray go`aano iyo natiijoyin wax ku ool u noqonaya buslshada.

Gebo-gabadiina waxaa loo isticmaalay oo natiijooyinkii dooddaas laga baahiyey SRTV.

## 2) QIIMEYNTA IYO IS BADDELKA QAADIYADA

Waxaa qorsheysaneyd in Laqiimeeyo dhamaan Qaadiyada Maxkamadaha shareecada sanadkii Hal mar , waxaa suura galay in la qiimeeyo 8 Gobal waxaa suura galiwayay 3 Gobal ee kala ah Daawa, Af-dheer iyo Liiban maadama ay Fogyihiin sanadkan abaaro daran ay ka jireen. Qiimayntaa waxaa laga soo saaray natiijooyin isku jira dalaacd , Erri , Badalaada iyo Hoos u dhigid iyo Digniino qoraal ah .
Qiimayntan ooy ujeedadiisu ahayd wanaajin iyo u kuur gal adeega garsoor ee loo hayo bulshada ayaa waxaa la qiimeeyay goobahan bishii 10-2014. T.I

- ⇨ Maxkamadda Guud ee Shareecada DDS
- ⇨ Maxkamadda Gobolka FAAFAN
- ⇨ Maxkamadda Gobolka ERER
- ⇨ Maxkamadda Gobolka QOARAXAY
- ⇨ Maxkamadda Gobolka JARAR
- ⇨ Maxkamadda Gobolka SITI
- ⇨ Maxkamadda Gobolka NOGOB
- ⇨ Waxaa qiimeyn iyo kormeer hal mar lagu sameeyay Gobolka DOOLLO

Waxaa laga qiimeeyay dhinacyada kala ah

- ⇨ Shaqo galka iyo ilaalinta saacadaha shaqada
- ⇨ Habka dacwdaha loo qaado
- ⇨ Anshaxa

**Is Baddelka Qaadiyada**

| T.T | FAAHFAAHINTA | TIRADA |
|---|---|---|
| 1 | MAGACAABISTA SANNADKAN (GUDOOMIYAYAAL, QAADIYAAL, REJISTARAALO iyo KAALIYAAL QAADIYADA) | 113 |
| 2 | DALACSIIN, BEDDALAAD, IYO HOOS U DHIGID | 39 |
| 3 | SHAQO KA QAADIS AMA ISKOOD UGA TAGAY | 17 |
| 4 | DIGNIIN QORAAL AH | 9 |
| | **WADARTA** | **178** |

## 3) KORMEERKA

Iyadoo lagaduulayo dadaalka ay Maxkamada Guud ee shareecada DDS ugu jirto kor u qaadida Maxakamadaha shareecada iyo tayaynta aqoonta qaadiyaasha si loo heloadeeg taya diisu sarayso iyo qaadiyaal leh xirfad sare, loona agoodo Geedi socodka Kiisaska iyo Cabshada Bulashada. Ayaa waxaa kormeero lagu sameeyay bishii **Tehsas 2014** Gobalada DOOLO, JARAR, FAAFAN, SHABEELLE, AFDHEER, ERAR, SITI & QORAXAY

**Natiijooyinka Kormeerada**

- ⇨ in hadda kadib Shirweynayaasha Cidhibtirka Caadooyinka Xunxun iyo hirgalinta dhaqamada wanaagsan lagu qabto Gobalada; waxaana bilowgii lagu qabtay Gobolka SITI, ka dib markii lagu ogaaday kormeerka dhaxdiisa inay baahi gaara ah ka jirto Arrimaha sharecada
- ⇨ Waxaa lasoo ogaaday Garsoor aan gudanin waajibaadkooda shaqo waxaana laga qaaday talaaboyin isugu jiray (Digniin , Badal , Hoos- udhig iyo Mushaar Joojin )
- ⇨ Waxaa abaal marin loo diyaariyay cidii ku sifowday shaqo wanaag taas oo isku jiraty (Dalacaad, Waxbarasho iyo Maal marin Loojistik ah)

## 4) KHIBRAD WADAAG - DALKA GUDIHIISA & DIBADDIISABA

### B. Khibrad isweydaarsiga Dalka Gudihiisa

**Maxkamadda Shareecada Degaanka Oromiya**

Waxaa lala yeeshay Khibrad Isweydaarsi dhinacyo badan lahaa Maxkamada Guud ee shareecada Deeganka Oromada. Khibrada isweydaarsigan ayaa ku saabsanaa nidaamka Dacwadaha loo qaado ee shareecada bilow ilaa dhamaad iyo Go`aan qaadasha qaadiyad , sidoo kalena in la iska kaashado dhamaan Arrimaha dacwda iyo shareecada gaar ahaana qodobadan hoose

⇒ Awood garsoorka xuduudda Labada deeganka ka dhaxeeya

⇒ Tababaro in si wada jir ah loogu qabto Degmooyinka dhaca xuduudda Labada Degaan

⇒ İn la iska kaashado waxbarashada iyo Tabarada dalka dibadiisa ah .

**Maxkamadda Shareecada Degaanka Benshagul-Gumuz oo Booqasho ku yimid Degaankeena**

Waxaa Maxkamada shareecada deeganka booqasho ku yimaaday Maamulka Maxkamada shareecada Deeganka Benishaguul –Gumaz. wafdigan oo uu horkacayay Gudoomiyaha Max.Guud ee shareecada , iyo Gudoomiyaha Max.sare ee Maglada Asoosa .Wafdigan inta ay joogeen deeganka waxaanu wadaagnay arrimaha Badan sida Nidaamka shaqo ee Maxkamadaha , shuruucada ay maxkamaduhu ku shaqeeyaan (Bayanada ) & Waayo aragni badan oo ku sabsan Arrimaha shareecada.

**Booqashadii Maxkamada shareecada Faderalka .**

Bishii Miyaziya / 2014 T.I .waxaa yimaaday Maxkamada Guud ee shareecada wafdi ka socday Maxkamada shareecada Fadaraalka , ujeedadoonu ahayn Khibrad isweydaarsi iyo Booqasho.

### T. Khibrad isweydaarsi Dalka Dibadiisaba

**Safarkii Hargaysa**

⇒ Maxkamada Guud ee shareecadu , iyadoo ka duulaysa qorshaha.2014 ayaa waxay safar khibrad is-waydaarsi ah iyo aqoon kororsi taariikhdu markay ahayd 12/ Oct /2021 ku tagtay Magalada Hargeysa wafdi uu hogaaminayo Gud. Max. Guud ee shareecada & Gud. Ku-xigeenka.

⇒ Wafdigan waxaa soo dhaweeyay kulana la qaatay Waziirka Awqaafta & Arrimaha Diinta dawlada S Land Mudane : sh.C.risaaq Xuseen Cali (Albaani).

⇒ Wafdiga Safarkoodu waxay ahayd in khibrad iswaydaarisi la sameeyaan Xafiisyada & Hayadaha xidhiidhka la leh shaqooyinka Maxkamadaha shareecada Waxaana u suura gashay in ay kulamo la yeeshaan Xafiisyadan hoose:
- ⇨ Wazaarada Diinta & Awqaafta
- ⇨ Maxkamada sare ee dalka
- ⇨ Maxkamada Magaalada hargeysa .
- ⇨ Jamacada Badar & Mac'hadka sare ee Jaamacadda Al-Bayaan .

⇒ Labada dhinac waxay isla qaateen in la xoojiyo xidhiidhka ka dhaxeeya Xafiisyada korna loo sii qaado wada shaqaynta , lana iska kaashado Awood Garsoorka xuduudeed ee u dhaxeeya DAWALADDA DEEGAN KA iyo DAWLADDA SOMALİLAND.

**Safirkii Dalka Jabuuti**

Taariikhdu markay ahayd 5/ Hidar /2014waxaa tagay Wadanka JABUUTI wafdi ka kooban Gud. Max. Guud ee shareecada & Madaxa maamulka Qaadiyada,ujeedooyinka ugu muhimsan ee safarku wuxuu ahaa , in Khibrad is waydaarsi indha indhayn xaalada **Mac`hadka Tababarka Qaadiyadae wadanka Jabuuti**. Sidoo kale wafdigu wuxuu booqday Maxkamadaha shareecada dalkaasi wuxuuna soo indha indheeyay qaabka ay uqadaan kiisaska qoyska iyo arrimaha xidhiidhka lala leh.

Waxaa safarkaas laga soo helay oo Qoraal ahaan looga soo qaatay:

- ⇨ Xeerka Qoyska ee Shareecada Islaamka (oo gashi u noqday diyaarinta Sharciga Arrimaha Qoyska Shareecada Islaamka ee Degaankeena, Qabyo-qoraalkiisiina dhamaaday)
- ⇨ Nidaamka Awqaafta Islaamka
- ⇨ Guddiga Dib-u-eegista Sharciyada (waa Guddi isku dhaf ah, oo sharciyada dib u qora, turjumana)

## 5) HAWLAHA KALE EE MUHIIMKA AH EE U HIRGELAY

## MAXKAMADAHA SHAREECADA DDS

**Waxaa kale oo u qabsoomay Shirweynaha 3aad ee Cidhibtirka caadooyinka xun xun ee ka dhanka ah Arrimaha Qoyska iyo Hirgalinta Caadooyinka wanaagsan ee ku qotoma shareecada İslaamka.**

⇒ Shir waynahan oo ah kii saddexaad ayaa waxaa sanadkan lagu qabtay magaalada shiniile(xarunta) gobolka siti waxaana loo gartay in sanadka lagu qabto siti kormeer iyo daraasaad lagu sameeyaya xaalada iyo duruufta gobolkaasi.

⇒ Shir weynahan oo qabsoomay 6/9 /2014.T.C. kuna qabsoomay hoolka shiraraka ee Deg. shiniile waxaa ka soo qayb galay culimo ka socotay Golaha sare ee arrimaha islaamka ,Gudoomiyaasha maxakamadaha shareecada dogmooyinka gobolka Siti, odoyaasha iyo waxgaratka Gobolka siti iyo xafiisyada cadaalada (maxkamada ,Xeer ilaalinta,koomishinka policeka ) ee G.SİTİ.

⇒ Ujeedada Shirkan oo ahayd sidii loo cidhib tiri lahaa caadooyinka xunxun ee ka dhanka ah arrimaha qoyska siiba dumarka iyo caruurta ayaa waxaa laga soo jeediyaya cashiro la xidhiidha Ariimahan hose :

- ⇨ Dumaasha khasab ka ah
- ⇨ Yaradka
- ⇨ Meher xadka
- ⇨ dhaxalka gaar ahaan Dumarka

Sidookale waxaa la soo bandhigay Natiijadii ka soo baxday dadaalkii la sameeyay **shirkii 2aad** kadib waana sidan hoose

| T.T | FAAHFAAHINTA | TIRADA |
|---|---|---|
| 1 | **Kiisaska Dhaxalka** | 250 |
| 2 | **Dumaasha Khasabka** | 22 |
| 3 | **Dumarka la isku haysto** | 18 |
| 4 | **Xoolaha Yaradka ah** | 29 |
| 5 | **Wacyi galin** | 143 |
| | **WADARTA** | **462** |

**Dhinaca sharciyada & Xeeraka Xafiisku diyaariyay (Qabyo)**

Maxkamada shareecada iyada oo ka duulaysa Dastuurka DDS , Bayaanka dib u aas-aasida maxkamadaha shareecada iyo Khibrad isweydaarsiyadii kala duwanaa ay la yee latay dalalka Jaarka ah ayay waxay Guda gashay in ladajiyo dhismo sharci oo xidhiidh laleh shareecada islaamka Maxkamadaha iyo Bulshada deegankuna u bahanyihiin waxaan diyaarintiisa labilaabay sharciyadan hose :

- Sharciga Arrimaha qoyska ee shareecada Islaamka (dhamaaday )
- Sharciga Habka dacwadaha ee kiisaska qoyska (socdaa )
- Xeer hoosaadka Gudiga Maamulka Qaadiyada Maxkamadaha shareecada (dhamaaday)
- Waxaa daraasaadka lagu sameeyey arrimaha dhawacyada /Jaa'ifooyinka isla markaana laga sameeyey wacyi-gelin balaadhaniyadoo qabtay doodo kala duwan oo lagu qabtay Qabridahar iyo Godey

**Shaqooyinka la qabtay ee xidhiidhka la leh Maamulka Qaadiyada**

Waxaa balaadhin lagu sameeyay **Xafiiska Maamulka Qaadiyada** iyadoo la magacaabay agaasimo cusub oo ka hawl gala, sida:

- Agaasinka Sharci Barida & Wacyigalinta (waxaa hoos yimaada dhamaan sharcibarayaasha /mudarisiint )
- Agaasinka Kormeerka & Tababarada
- Agaasinka Xogta Qaadiyada

## 6) XOGTA DACWADAHA & DAKHLIGA KA SOO XEROODAY

QS 2014, wadarta guud ee dacwadaha soo galay Maxkamadaha Shareecada DDS waa **9,516** Gal-dacwadeed, waxaana go'aan helay **9,209.** Inta u gudubtay QS 2015 ay tahay **487,** taas oo noqonaysa in la go'aamiyey **94.9%.**

Dacwadahaas waxa ay ka kooban yihiin:

1) **GUUR 2,700 (28%)**
2) **FURIIN 1,400 (15%)**
3) **XUQUUQ (Masaariif, Xannaano Caruureed, iyo Meherka) 5,000 (52%)**
4) **DHAXALKA 250 (3%)**
5) **Kiiaska Sugidda Nasabka, Hibada, Qofka la waayo, & Waqafka 166 (2%)**

Sidoo kale, waxaa adeegga maxkamadaha shareecada ka soo xerooday Dakhli dhan **4,081,699 Birr.**

Faahfaahinta Xogta Dacwadaha iyo Dakhliguba waa sidan ku cad shaxdan:

## *MAAREYNTA DACWADAHA IYO DAKHLIGA KA SOO XEROODEY MAXKAMADAHA SHAREECADA DDS QS 2014*

| TT | MAXKAMADAHA SHAREECADA | TIRADA DACWADAHA SOO GALEY | TIRADA DACWADAHA GO'AANKA HELAY | TIRADA DACWADAHA SOCDA | DAKHLIGA SOO XEROODAY |
|---|---|---|---|---|---|
| 1 | MAXKAMADDA GUUD SHAREECADA | 533 | 526 | 7 | 316,550 |
| 2 | MAXK .SHAREECADA GOBOLKA FAAFAN | 2,516 | 2,328 | 188 | 1,228,233 |
| 3 | MAXKAMADAHA GOBOLKA SITI | 785 | 734 | 51 | 111,750 |
| 4 | MAXK .SHAREECADA GOBOLKA JARAR | 991 | 950 | 41 | 378,528 |
| 5 | MAXK .SHAREECADA GOBOLKA QORAXAY | 418 | 418 | 0 | 326,770 |
| 6 | MAXK .SHAREECADA GOBOLKA SHABEELE | 1323 | 1159 | 164 | 540,322 |
| 7 | MAXK .SHAREECADA GOBOLKA DOOLO | 152 | 150 | 2 | 186,105 |
| 8 | MAXK .SHAREECADA GOBOLKA ERAR | 818 | 807 | 11 | 304,896 |
| 9 | MAXK .SHAREECADA GOBOLKA LIIBAAN | 495 | 479 | 16 | 145,000 |
| 10 | MAXK .SHAREECADA GOBOLKA AFDHEER | 827 | 825 | 2 | 179,600 |
| 11 | MAXK .SHAREECADA GOBOLKA DAAWA | 242 | 240 | 2 | 229,270 |
| 12 | MAXK .SHAREECADA GOBOLKA NOGOB | 416 | 413 | 3 | 134,675 |
| **WADARTA** | | **9,516** | **9,029** | **487** | **4,081,699** |

| | |
|---|---|
| **% Heerka Go'aanka** | **94.9%** |

## Caqabadaha shaqooyinka Maxkamadaha shareecada Heerarkooda kaladuwan

- **Xafiisyo la'aan** : Maxkamadaha shareecaduintooda badan malaha Xafiisyo dadka loogu adeego waxayna ladagan yihiin Maxkamada kale culays badana way ku hayaan .waxaana hada usii daran (Max.sare ee Faafan . Jarar , iyo qoraxay )
- **Miisaniyad Yaraan**: Xafiiska Miisaniyada loo qorsheeyo sanad walba waa miisaniyad aad u yar markii la eego Adeegyada uu bulshada u hayo iyo Cududa Ka shaqaysa . gaar ahaan maamulada dagmooyinku xil iskama saaraan xafiiska shareecada.
- **Gaadiid la'aan**: Xafiisku malaha wax gawaadhi ah , marka laga yimaado xafiiska maxakamada guud ee shareecada oo haysta ilaa 4 gaadhi kumanaba fila . gobalada iyo dagmooyinku hala mahaystaan.
- **Miisaaniyada Tababarada & kormeerada oo aad u yar** : Garsoorka Maxkamadaha shareecadu wuxuu ubahanyahay Tababar intan kabadan miisaaniyda sanadwalba loo qarsheeyana aad bay u yartahay .
- **Baahida Shaqo la'aanta Culumada oo Za'id ah :** Maxkamadaha shareecadu waa goobta kaliya ee Culumadu usoo raadsadaan Fursado shaqo Xafiiskuna ma awoodi karo tirada intaas leg in uu ka jawaabo baahidooda shaqo .
- Muhiimada Xafiisku uu u leeyahay bulshadeena oo ladareemo aragti fiican laga qaato .
- **Mushaar yari :**mushaarka Garsoorku qaato oon ku filnayn baahidoodana aan dabooli karin.
- Qaadiyada heerdegmo badankood maamulka degmooyinka kama helaan xuquuda Qaadiyada sida ( gunooyinka iyo kororada Mushaarka **)**

## Gunaanad

Maxkamadaha shareecadu waxay soo mareen caqabado kala duwan hasayeshee isbadalkii kadib waxaa laqabtay wax qabad lataaban karo sida madax banaanida,gawaadhida,dhismaha iyo tababaro badan ,xukumaduna waxay galisay dadaal dheeri ah si loosoo celiyo haybadii xafiiska.

Dhinaca kale waxaa jira caqabado badan oo u bahan in laxaliyo sida in kor looqaado awood garsoorka maxkamadaha iyo in la dhiso xafiisyo tayo lehoo loogu adeego bulshada.